

ODOBKA 1: HORDHAC (Executive Summary)

Heshiiskan waxa uu qeexayaa qorshe nidaamsan oo lagu naqshadeynayo laguna horumarinayo website xirfadaysan, casri ah, isla markaana la ballaarin karo (scalable) oo ay yeelan doonto hay'adda **African Institute for Research and Leadership (AIR Leadership)**.

Qaab-dhismeedka website-ka, hab-socodka menu-yada, iyo naqshadda guud waxa lagu saleeyn doonaa mareegaha hay'adaha cilmi-baarista caalamiga ah ee hormuudka ah sida **CSIS.org**, si loo xaqiijiyo kalsooni, caddeyn, iyo saameyn sare.

QODOBKA 2: UJEEDDOOYINKA MASHRUUCA (Project Objectives)

Website-ka AIR Leadership waxa loogu talagalay:

1. In la dhiso joogitaan dijitaal ah oo hay'adeed oo xooggan
2. In lagu soo bandhigo cilmi-baarista, barnaamijyada, khubarada, iyo hoggaaminta hay'adda
3. In lagu daabaco falanqeyn, warbixinno, dhacdooyin, iyo waxyaabo warbaahineed
4. In la kordhiyo muuqaalka hay'adda, ka-qaybgalka daneeyayaasha, iyo sumcadda hay'adda

QODOBKA 3: QAAB-DHISMEEDKA MENU-GA WEBSITE-KA (CSIS-Inspired Website Menu Structure)

Website-ka AIR Leadership waxa uu raaci doonaa qaab menu oo nidaamsan, lana mid ah qaabka **CSIS.org**, balse loo habeeyey baahiyaha gaarka ah ee hay'adda.

QODOBKA 4: XIRMADA QIIMAHEEDA IYO ADEEGYADA (Cost Packages & Menu Features)

Xirmada 3aad: Website Heer Sare ah (Premium Website) – \$800 (sideed boqol oo doolar)

Hosting, Domain, SSL iyo Emails waa ku jira

Menu-yada dhammeystiran (Full CSIS-Style):

- Home
- About AIR Leadership
- Leadership & Staff
- Financial Information **(Fee Members)**
- Programs
- Experts (advanced profiles)
- Analysis / Research
- Regions & Topics

- Events (calendar & registration)
- Digital Reports & Publications
- Charts & Data Visualizations
- Podcasts
- Newsletters (subscription system)
- Videos & Multimedia
- Microsites (mashaariic gaar ah)
- Executive Education
- Careers & Culture
- Media Requests
- Location & Contact

Astaamaha (Features):

- UI/UX si buuxda loo habeeyey
- CMS horumarsan oo leh heerar isticmaalayaal kala duwan
- Multimedia & xog-muuqaaleyn (Data visualization)
- Amni sare & keydinta xogta (Backups)
- SEO heer sare & hagaajinta waxqabadka
- Tabobaridda 3 shaqaale oo websitr ka shaqeynaya.
- 12 bilood taageero farsamo oo bilaash ah

QODOBKA 5: JADWALKA MASHRUUCA (Project Timeline)

1. **Qiimeynta Baahiyaha (Needs Assessment):** 2 maalmood
2. **Naqshadeyn & Horumarin (Design & Development):** 1 toddobaad
3. **Gelinta Content & Tijaabo (Content Upload & Testing):** 2 maalmood
4. **Daah-fur Rasmi ah (Official Launch):** Marka dhammaan qodobada heshiiska la xaqiijiyo

QODOBKA 6: HIRGELINTA IYO MAS'UULIYADDA

Fuliyaha waxa uu mas'uul ka yahay hirgelinta dhammaan qodobada lagu heshiiyey xirmada uu doorto Macmiilku, halka Macmiilku uu bixin doono xogta, content-ka, iyo ansixinta loo baahan yahay waqtigeeda.

QODOBKA 7: DHAQANGALKA HESHIISKA

Heshiiskan waxa uu dhaqan gelayaa marka ay labada dhinac saxiixaan, waxana uu waafaqsan yahay hab-dhaqanka heshiisyada caalamiga ah (International Standard Agreement).

QODOBKA 8: SHURUUDAHA BIXINTA (Payment Terms)

1. Macmiilku waxa uu oggolaanayaa inuu bixiyo kharashka xirmada (Package) uu doorto sida ku cad Qodobka 4 ee heshiiskan.
2. Bixinta waxa loo sameynayaa sidan:
 - **50% lacag hormaris ah (Advance Payment)** marka heshiiska la saxiixo
 - **50% inta hartay** marka website-ka la dhammeystiro ka hor daah-furka rasmiga ah
3. Dhammaan lacagaha waxa lagu bixinayaa **Doollar Maraykan (USD)**, hab lacag-bixineed oo labada dhinac ku heshiyyaan.
4. Haddii Macmiilku dib u dhigo bixinta lacagta waqtigeeda, Fuliyuhu waxa uu xaq u leeyahay:
 - In uu hakiyo shaqada mashruuca ilaa bixinta la dhammaystiro
 - Ama in uu dalbado magdhow ku habboon dib-u-dhaca

QODOBKA 9: JOOJINTA HESHIISKA (Termination)

1. Heshiiskan waxa joojin kara mid kasta oo ka mid ah labada dhinac haddii:
 - Mid ka mid ah dhinacyadu ku xadgudbo qodobada heshiiska
 - Ama uu ku guuldareysto fulinta waajibaadkiisa si macquul ah
2. Joojinta heshiiska waa in lagu sameeyaa **ogeysiis qoraal ah** oo ugu yaraan ah **7 maalmood** ka hor.
3. Haddii heshiiska la joojiyo:
 - Macmiilku waxa uu bixinayaa dhammaan shaqada ilaa waqtiga joojinta la qabtay
 - Lacagta hore loo bixiyay (advance) lama soo celinayo haddii shaqadu bilaabatay
4. Fuliyuhu waxa uu wareejinayaa dhammaan shaqada la dhammeystiray ilaa heerka joojinta, marka la helo lacagta ku waajibtay.

QODOBKA 10: SIRTAA IYO ASTURNAANTA (Confidentiality)

1. Labada dhinac waxa ay ku heshiiyeen in dhammaan xogta, dokumentiyada, fikradaha, cilmi-baarista, naqshadaha, iyo macluumaadka la wadaago inta heshiiskani socdo loo aqoonsado **xog sir ah**.
2. Xogta sirta ah lama shaacin karo, lama gudbin karo, lamana isticmaali karo ujeeddo kale oo aan ahayn fulinta heshiiskan, iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin dhinaca kale.
3. Qodobkan sirta ah waxa uu sii ahaanayaa mid dhaqan gal ah xitaa marka heshiiskan la joojiyo ama dhammaado.
4. Fuliyuhu waxa uu ballan qaadayaa in aanu:
 - Isticmaalin xogta Macmiilka si shaqsi ama ganacsi kale
 - Ama u gudbin cid saddexaad oggolaansho la'aan

QODOBKA 11: XUQUUQDA HANTIDA MASKAXEED (Intellectual Property Rights)

1. Marka dhammaan lacagaha lagu heshiiyay la bixiyo, xuquuqda buuxda ee website-ka, content-ka, iyo dhammaan wax-soo-saarka mashruuca waxa iska leh **AIR Leadership**.
2. Fuliyuhu waxa uu xaq u leeyahay oo keliya inuu shaqada ku xuso **portfolio**-giisa, haddii uusan Macmiilku si gaar ah uga hor imaan.

SAXIIXYADA (DIB LOO CUSBOONEYSIINAY)

Macmiilka (AIR Leadership):

Magac: _____

Jagada: _____

Saxiix: _____

Taariikh: _____

Fuliyaha (Website Developer):

Magac: Abdirashid Isse Osman

Shirkad: Ramaas Software

Saxiix: _____

Taariikh: January 5, 2026